# Baafiska laanqeerta cas ee Iswiska

**Laanqeerta cas ee iswiska waxay dadka ka caawisaa raadinta ehelka la raadinaayo**







RESTORING FAMILY LINKS

Croix-Rouge suisse
Schweizerisches Rotes Kreuz
Croce Rossa Svizzera



# Baafiska laanqeerta cas ee iswiska

Qaybta baafinta ee laanqeerta cas ee iswiska waxay u furan tahay dhamaan dadka ku nool iswiska, kuwaas oo baafinaya ama raadinaaya mid ka mid ah ehelkooda ama qof aad ugu dhow.

In dad ehel ah kala tagaan oo ay kala fogaadaan waxaa keeni kara dagaal, masiibooyin ama hijro dhul kale loo haajiraa. Marmar ayaa laakiin waxaa dhici kara in ehel kala fogaadaan, ayadoo sababtu tahay muran, ama ilmaha oo dad kale qaataan oo korsadaan ama arimo bulsho oo kale.

Qayba baafinta ee laanqeerta cas ee iswisku waxay ku siinaysaa talo adiga kuu khaas ah, waxayna kaloo si joogto ah kuula socodsiinaysaa halka baadigoobkii uu maraayo.

**Wadashaqayn ka dhaxaysa laanqeerta cas ee wadanka iyo ururada bisha cas**


© ICRC, Virginie Louis

# Waxqabkayaga

- Raadinta dadka la waayay
- Soo gudbinta wararka laanqeerta cas
- Keenida cadaynta xirnaashaha qofka la la xiray laanqeerta cas ee caalamiga ah
- Raadraac halka qofka la baafinayo ku danbeeyay iyo Qabriyada
- Caawinaad iyo la socosho marka la goobaayo Dokumentiga shakhsiyadeed iyo fiirinta faylasha
- La socosho marka ehelka la isku keenaayo Marka dowladu bixiso ogolaasha



## Waxaad toos uga raadinkartaa

## www.familylinks.icrc.org

Waxaad website-ka familylinks ee ICRC ka heli kartaa:

- In aad ka baafiso ehelkaaga hadii ay masiibo ku habsato halkii ay deganaayeen.
- In aad aragto liiska magacyada dadka la la'yahay meelaha caalamka dhibaatooyinku ka taagan yihiin.
- In aad aragto ama aad hesho masawirada iyo magacyada dadka Yurub ku sugan oo ehelkooda baafinaya.
- In aad ogolaatid shaac bixinta masawirkaaga iyo maga-caaga hadii aad qof Yurub ka dhex raadinaysid.
- In aad soo gudbiso akhbaarta ku saabsan qofka la raadinaayo.
- In aad hesho akhbaarta Network-yaga.

Website-kaan wuxuu suurto galinayaa si caalamka oo dhan ah in aad u hesho gelid waxqabadka (Restoring Family Links), dib u habaynta xiriirka ehelka. Network ama isku xirka Redcross-ka iyo laaqeera bisha cas.



## U howlgalka, iyo xil iska saarida

- Laanqeerta cas ee iswiska waa urur samafal ah, oo ahna mid madax banaan oo dhexdhexaad ah.
- Akhbaartaada shakhsiyadeed iyo akhbaarta midka la raadinaayo si amaano leh ayaa loo xafidayaa.
- Si wada jir ah oo adiga lagula tashanaayo ayaa talaabooyinka loo qaadayaa.
- Raadinta dadka la waayay ayaa qaybta baafinta laanqeerta cas ee iswiska ay kala kaashataa ICRC iyo 187 qaybood oo baafiyayaasha Redcross-ka iyo bisha cas.
- Qofka la baafinaayo ama la raadinaayo inta aan si toos ah loola xiriirin ayaa la waydiinayaa in uu doonaayo in loo geeyo ehelkii iyo in kale.
- Waxqabadka qaybta baafinta waa mid lacag la'aan ah, hadiise aad tabarucaad bixinayso waanu soo dhawaynaynaa.


RESTORING
FAMILY LINKS

**Schweizerisches Rotes Kreuz**
**Suchdienst**
Rainmattstrasse 10
3001 Bern
Telefon 031 387 73 80
tracing@redcross.ch
www.redcross.ch

Mucaawinadu waxaa ay ku dhacaysaa
**xaafiiska baafinta SRK**
Suchdienst SRK
Postkonto 70-79907-1
Adoo ku qoraaya: Suchdienst SRK

**Aad baad u mahadsan tahay.**

Somalisch | Somalien | Somalo




Croix-Rouge suisse
Schweizerisches Rotes Kreuz
Croce Rossa Svizzera